
# AXDI JACAYL




QORE: ANISA CUMAR SALEYMAAN.

# A[illegible]DI JACAYL

TAA QISO DHAB AH WAXAANA LAGU

DAABACAY MUQDISHO JANAAYO

1988

QORE:- ANISA CUMAR SALEEBAAN

# H O R DH A C

Akhrista yaasha qiimaha iyo qaayaha lahoow wax walbaa ujeedo ayay leeyihiin marka la idiin soo ban dhigaayo qiso ha ahaato mid dhacday ama mid maskaxeed ula jeedada uu ka leeyahay qoruhu waad garan kartaa,waana in aad ka faa'iiday-sato qisadan oo la kulmi karta adiga ama saaxiibkaa.

Akhristoow qisadani waa qiso dhab ah oo dhacday waxayna si toos ah u taabanaysaa qiimaha uu leeyahay jacaylku,iyo sida uu qofka uu u taabto jacaylka dhabta ah ee a aanuu qalbigiisu meel kale u janjeersanayn taas waxaa tusaale inoogu filan boqorkii jacaylka ee (BOODHARI) iyo qisadan dhacday ee aan idiin soo bandhigay.

Akhritoow waxay qisadaani kuu tilmaan-aysaa wado ku dayasho mudan,gaar ahaan dhalinyarada soo koraysa,waana qiso kugu abuu-raysa dareen jacayl,waa qiso kuu tilmaamaysa inu calafku yahay wax aan la is hor taagi karin qisadaani waxay ku cranaysaa kalsooniyi ma timaado hadii aan xiliga dhibaatada la isu xagal dabcin,waxayna kaa dheeraynaysaa isla waynida iy yasida

Buugaan Axdi jacayl weeye balan weeye inaad ka helaysoarintuu idiin bayaaninaayo qiso dhacday baan baafinayaa biloow oo akhriskiisa dhamee axdigii jacaylka weeye abwaan loo bogay baa baaray

labadii bilanayd ee
beryo baasha iska eegta
balan qaad isku ogaada iyo
axdi balaaran beryo haday
is moogaadaan,axdigoodu ma
baaba'o,balan weeye midkaasi
ee yaan been loo ralaynin
axdiga yaan la beensan oon
la baabi'in weligii ee barta
aad ka bilowdaan ku dhameeya
weligiin,beryo hadii la is
moogaado axdiga yaan la been-
san,dhalinyarada beeshaay
axdiga yaan la beensan
balanteenu waa inaynu beegsano
labadii bilanayd,aan idiin
balbalaatiyee boqorkii far-
aan iyo boqoradii haweeya,ee
axdiga baaninaayey,Alahayoow
axdigeena adkee oo arinteena
ilaali.

## M A H A D C E L I N

Dadkii soo saaristeeda ka qayb qaatay dhamaan way mahadsan yihiin, gaar ahaan waxaa xusid mudan:

| | |
|---|---|
| Qaasin aadan saleebaan | (Promis) |
| Xaliimo aadan cali | (Bocoriina) |
| Xasan aadan x; cabdi | (Gahayr) |
| Xasan Maxamed S | (Golof) |
| Aamina xuseen afrax | (Birta) |
| Yaxye cumar macallin | (kaahin) |
| C/raxmaan maxamed | (Xaange) |

Waxaan si gaar ah ugu mahad celinayaa Saleebaan cumar saleebaan oo iga caawiyey dhanka makiinada.

F.G: Dhamaan akhrista yaasha waxaan ku wargalinayaa inaan buugan la daabacan karin lana guurin karin iyada oon ogolaansho laga helin qoraha

Waxaa lagu daabacay Muqdisho

Janaayo 1988



## QEYBTA KOWAAD

Goortu waa todobadii fiidnimo, jawiga Magaalada Muqdisho waxaa ka muuqda biliosanaan gaar ah, Dhalinyarada Magaalada mareysana waxaa ka muuqday farxad aad u sareysay.; waxayna si wada jir ah u soo dhaweynayeen Ciidda sanadka cusub ee 1982dii oo kowsanoysay haboonkaas, qof walibana wuxuu isku dayay siduu farxad iyo ixtiraam ugu soo dhaweyn lahaa Haboonkaas.

Farxaan oo ka mid ahaa dhalinta ciidda isku diyaarinoysay wuxuu ka soo baxay Gurigiisa 7:30kii fiidnimo, isagoo labisan dharkiisii ugu mudnaa, watana Gaari yar oo uu lahaa, wuxuuna u soo dhaadhacay dhanka Magaalada, si uu u soo daawado bilicda Magaalada iyo jawiga ka muuqday oo doganaanta iyo farxada ka muuqatay.

Intii uu daawanayay waxyaabahaas niyadiisu waxay daroomoysay farxad iyo reyn-reyn, waxaa kale oo xiiso geliyay sida ay dhalinyaradu u labisnoyd iyo sida ay isula socdoon koox-koox, waxaa kalo oo uu aad u sii jeeloysanayay marka ay idhihiisu qabtaan wiil iyo gabar wada socda, waxaanu niyada iska oranayay, oo uu ku fekerayay ""Goormaad adiguna sidaan oo kalo u daadihin doontaa? mid kula qeybsata farxada iyo nolashaba."".

Intii uu fekerkaas ku maqnaa ayuu Gaarigii jiirsiiyay gabar jidka mareysay, waxayna ku negotay naxdin iyo lana filaan, wuxuuna u qaadan waayay inuu shil galay, waxaa uu isku canaantay "Maxaa Gaariga baas kuu soo kaxeeyay?" ijtii uu ku maqnaa canaanta naftiisa ayaa wadada marayay ku

soo ururoon goobtii shilku ka dhacay, Farxaan inta uu ku ambabaray qeylada iyo sawaxanka, agtiisa ka baxaya ayuu Gaarigii iridiisii furay soona degay, dadkii qaar ka mid ah ayaa ku qayliyay, oo ku yiri "War maxaad la taagan tahay? maad qofkan dhiig baxaya moosha ka qaadid?

Farxaan baa soo dhaqaaqay, oo soo dul istaagay gabadhii, wuxuuna arkay in gabadhu suuxsan tahay, oo lug gaarigu ka maray, wejigana uu dhiig badan ka socdo.

Inta uu Gaarigii saaray ayuu ula carcaray Cisbitaalka Dig-feer, intii uu jidka ku sii jiray wuxuu ka wel-welsanaa mushaakilkii ku dhacay iyo farxadiisii sida ay u dhaxtaalan tahay; waxaa kale oo uu ka wel-welsanaa dhibaatada uu u geysatay gabadhan uu Gaariga jiirsiiyay.

Markii uu Cisbitaalka koonayay ayuu si deg-deg ah uga soo degay Gaarigii, waxayna isla markiiba galeen Cisbitaalkii isagoo ay naxdin iyo wel-wel fara badani ka muuqdo, waxowna u yeeray dhoowr kalkaaliye, oo ka mid ahaa Shaqaalihii habeenkaas shaqada lahaa, waxowna u sheegay inuu wado qof dhaawac soo gaaray; kalkaaliyeyaashii ayaa si deg-deg ah u soo raacay, kalkiibana waa la soo qaaday gabadhii dhaawacaa aheyd, dhiigii kaga yaalay wejiga ayaa laga nadiifiyay, meelihii nabaradu kaga dhaceena waa laga daawooyay, markii intaa la sameeyay ayaa la ogaaday in lugta midu jaban tahay, Farxaan oo dibada taagan ayay u yeereen una sheegeen in gabadhu lugta midu jaban tahay, hadeerna aan la kabi karin, oo aanu joogin dhaqtarkii qaabilsanaa Kabniinka Lafaha.



markaa aroorta ayey u baahan in la kabo, haddana halkan ayaad uga tegeysaa, wax mijir ahna malaha, oo aroorta isu kaaya keen.

Farxaan oo wel-welkii ku sii batay markii la yiri gabadhu wey jaban tahay, ayaa ku jawaabay, "Waa tahay," isagoo luudaya ayuuna Gaarigiisii soo gaaray, markii waa uu so dhaqaajiyay, wuxuua soo abbaaray Gurigiisa oo ku yaala Xaafada Kaasa-balbalaara, saacaduna waxay sheegeysay 9:ookii fiidnimo, kolkii uu Gurigiisa yimid ayuu yeeriyay hoonka Gaariga, waxaanaisla markiiba irida ka furay waardiyihii Guriga, Gaarigii ayuu geliyay gudaha, waxaa uuna furtay Qolkiisii isagoo caggo jiidaya iskuna tuuray Sariirtiisii, nasiib daro Farxaan cid wel-welka la qeybsataa Guriga ma aaney joogin.

Taas oo ay ugu waaneyd iyada oo ay waalidkiis iyo walaalihiisba ay ka maqnaayeen, Farxaan wuxuu ka dhashay reer dhaqan oo Illaahey nicmo siiyay, Hooyadiis iyo Aabihiis waxay ku maqnaayeen Dalxiis ay u aadeen Ameeriko, Farxaan waxaa la dhashay wiil iyo gabar ka waaweyn, waxayna waxbarasho ugu maqnaayeen Roomaaniya, taas ayaana keentay in Farxaan wel-welka kula hgalgasho Sariirtiisa,.

Farxaan wuxuu ahaa wiil dhalinyaro ah, da'diisuna waxay aheyd 21 jir, wuxuu ka soo baxay Dugsiga sare oo 15ka may, markii uu waxbarashadiisii Dugsiga sare dhameystay ayaa maalin maalmaha ka mid ah waxaa u yeeray Aabihii iyo hooyadii, waxayna kula taliyeen in aanu Jaamicad galin oo uu iska dhaafo, si uu u kala maamulo Xoolahooda, cid maamusha weysan.

Aabihiis oo hadalkii qaadanaya ayaa yiri "Maandhoow aniga waad ii joodaa, oo xoog dambe iguma jiro, wiilkii iyo gabadhii walaalaana waad ogtay, oo waxbarasho ayey ku maqan yihiin, adiguna hada ayaad rabtaa inaad

tagto, marka waxaan ku oran lahaa haddii aad duco iga rabtid iska joog, oo xoolahoona dad la'aanta heyso inooga shaqee."

Farxaan oo si wanaagsan u dhoygsanayay hadalkii Aabihii, laguna yaqiinay baarinimo, iyo ihego nugayl, ayaa hadalkii qaatay wuxuuna yiri: "Waayahay Aabo, wixii aad igula talinana marna diidi maayo, Aabihiis, oo hadalka wiilkiisa ku faraxsan, ayaa yiri "Awalba waan garanayaayay in waxa aan ku iraa hor istaageyn, maanta laga bilaabo furaha Guriga iyo maamulka lacagtaba adiga ayaan kugu wareejinayaa; bori Aroorna Gaari ayaan kuu soo iibinayaa;"

Farxaan ayaa farxad la kala dilaaci gaaray mar kaliya ayaa intuu soo booday Aabihiis isku duubay oo labada dhaban ka dhunkaday, sidaas ayeyna ku dhisneyd nolosha Farxaan.

Wax uu galgasho haboonkaa oo dhan, goor dambo ayuu gam'ay markii uu waagii baryay ayuu toosay, si dog-dog ahna isu diyaariyay, markii uu qureeodayna Gaarigiisii ayuu horo ka Istaadhay, wuxuuna soo abbaaray dhankii Cisbitaalki Dig-feer, oo uu xaleyto gooyay gabadhii uu Gariga jiirsiiyay.

Goortii uu soo galay Cisbitaalkii, ayuu si dog-dog ah u galay wuxuuna meel aan ka dheereyn ka arkay gabadh ka mid kalkaaliyaasha Cisbitaalka, wuxuuna weydiiyay xaalada ay ku sugan tahay, gabadhii uu xaleyto keenay Cisbitaalka, waxayna u sheegtay in gabadhii ladan tahay lana kabay Saakay, loona gudbiyay qeybta



Qolka saddexaad.

Isla markiiba si dog-dog ah ayuu u abbaaray qolkii loo tilmaamay, intii uu jidka ku sii jirayna wuxuu is weydiinayay su'aalo faro badan oo ay ka mid ahaayeen :- Haddii aad tagto qolka ay gabadhu jiifto maxaad ku oraneysaa? maba taqaanid magaceeda iyo muuqeeleba e, oo waa tii xaley wejigeedii bedelmey ee, timuhuna wejiga ka saaraayeen, waloo Farxaannow maantaa laguu yaabaa."

Markii uu soo gaaray Qolkii ay tilmaantu ahayd, ayuu qooraansaday intaanu golinba, waxauuna isha mariyay haweenkii meesha jiifay oo dhan, waxaa uu meel aan kafogeyn ka arkay gabadh dhalinyaro ah, oo ku jiifto sariir lugta midigna ay jeeso ka saaran tahay.

Gabadha waxaa ka muuqday diif iyo darxumo aan yareyn, Farxaan ayaa soo dul istaagay Gabadhii; oo hurudo, markaas ayuu eegay wejigeeda, wuxuuna ku arkay nabaro badan oo dhawaan la daaweeyay, kaasoo ahaa kii xaleyto soo gaaray, Farxaan, u caddaatay in gabadhu tahay tii uu dooneyay, waxa kale oo uu isha la sii raacay Quruxda iyo qaab dhismeedka jirkeeda, oo aad u jeclaysiiyay Farxaan, waxay gadhu sidatay, dhar jeexjeexan, kabana maba sidan.

Farxaan oo ka xun diifta iyo darxumada ka muuqata weliba dultaagan gabadhii isna leh ma kicisaa? ma deysaa? ayey gabadhii indhaha kala qaaday, waxayna aragtay wiilkan dultaagan, kuna dhoygagsan, waxayse horo ula socotay in wiilka Cisbitaalka keenay oo Gaariga jiirsiiyay uu dhawaan iman doono, taas oo ay horo ula sococdsiisay gabar ka mid ah kalkaaliyaasha Cisbitaalka.

Garatay in wiilku wiilkii yahay, farxaan Ayaa hadalkii bilaabay oo yiri:-iska waran Walaal sidee tahay, nabad walaal waan ladanahay inkastoo maduxu i yar xanuunayo.

Farxaan ayaa hadlay oo yiri:

""Waxay ila tahay inaadan i garanayn, oo bal aan isu kaa sheego. Aniga magacayga waxaa la yiraa Farxaan Warsame, waxaana ahay wiilkii waday Gaarigii xalay ku dhaawacay, marka sidaa ula soco."" gabadhii baa ku jawaabtay '''waayahay walaal waad mahadsan tahay Gargaarkii degdega ahaa oo aad ii fidisay Iyo booqashadan ka danbeysay?""raga qaarbaa i Ntay gaariga ku jiirsiiyaan kaaga taga jidka """Walaal anigu aan isu kaa sheegee magacayga Waxaa la yiraahdaa haweeya suldaan!"""

Farxaan ayaa wuxuu jeeleystay inuu wareysto gabadha iyo reerkooda meesha laga hello, wuxuuna yiri:

""Walaal, waxaan rabaa inaad ii tilmaamto meesha reerkiina laga hello, si aan ula socodsiiyo Arrimahaaga iyo shilka dhacay.""

Haweeyo markii ay hadalada s dhegahooda maqleen ayey falaar badani wadnaha iska taagtay, jirkiina jiririco ayaa ku jajabtay, qalbigeedii ayaa gadoomay, indhaheedjiina ilimo ayaa iski soo taagtay, Farxaan oo dareemay in ay oraydiisii gabadha guboon kana yaabay dareenka ka muuqda wejigeeda, ayaa ku yiri:

""Walaal, ma hadaladii aan ku iri ayaad dhibsatay?""



Haweeyo, oo aan wax hadal ah ka soo bixin afkeeda, ayaa ilimo ka soo daadatay, markaasey tiri:

""Waxba walaal, ima aadan yeelin, oo waxan ka calool xumahay oo niyada iska koy rogtay cid la'aanta i heysata iyo hadalka aad i tiri.""

""Aan kuu warameo aniga wax dad ah iima halkan, Aabahey aniga oo uurka hooyadey ku jira ayuu dhintay, Hooyadeyna aniga oo yar ayey dhimatay, waxaana la noolaa oo i soo korisay Eeddey ay Aabahey walaalo ahaayeen, waxaana ku u nooleyn meel Baadiyaha Laas-caanood ka tirsan, waxaan ku noolaa nolol xun, silic rafaad, dhib iyo dabo jeeg, waxaan deris la ahaa Ul iyo canaan, wohel adduun waanu kala haayirnay, ma soexan hurdo lagu riyaaqo, cuntadu ciriri bey igu ahayd, caano yar oo hoo ku go'a wax dhaadsiisan , ma arki jirin,hawsha aan qabtaa xad ma lahayn, weligayna la iiguma dul qaadan gaf yar oo aan galay.

Waa aduunyee waxaa dhacday in oday reer miyi ahaa oo adeer ugu aadanaa ninka eedaday qaba uu isoo doontay La ina siiyey,aniga oo aan waxba ogayn ayaan imid gurigii goor ay gabal dhac tahay,gaajo xumina i hayso,ilbeen ma cuno wax caanahaas ariga dhaafsan ee

Waxaan fariistay aqalka kadinkiisi (IRIDIISII) aniga oo niyada ka ooynaya ayaa waxaan maqlay hadal ay ku sheek-

aysanayeen eedadeey iyo wiil ay dhashay oo curad u ahaa, waxayna isku lahaayeen:-

'''hooyo sahaloow aan kuu warameo odaygii geele ee awoowgaa ahaa maanta ayuu inoo yimi aniga iyo aabahaa oo wada fadhina wuxuuna noo sheegay inuu naga doonayo Haweeya, anaguna waanu siinay oo waxaanu ku balansanahay inuu laba ma'lmood kadib yaradkii keeno, gabadhana loo guuriyo, sow sax maaha hooyo'?' Sahalna wuu ku raacay, wuxuuna ugu jawaabay :- ""waa sax hooyo odaygaasi waa oday lacag leh ee bal aan ka ag dhawaano"""

''' Goortii ay dhagahaygu maqleen hadaladaas ayaan naxay oon miyir beel ku dhawaaday Iskama aan waalin ee waxaan iska dhigay midan wax ogayn, waxaan la kala baxay saantaydii yaraydee aan ku seexan jiray, oo madax iyo minjo is duubay, habeenkaas wax hurdo ah igama soo dhicin waxaan ga'dhay go'aan deg-deg ah, kaas oo ahaa inaan ka baxsado reer baaskan i silcinaaya, waxaase mashaakil igu noqotay sidii aan u baxsan lahaa!!! iyo meeshii aan u baxsan lahaa, waxaan go'aansaday inaan usoo baxsado Xamar,

Waxaanse waayey meel aan is irahdo allaylehee halkaasaad baabuur raac ka helaysaa.



Sidii aan habeenkaas oo dhan u gal-galanaayey ayuu waagii baryey, markiiba inta aan soo toosay ayaan shaqadaydii aaday, sidii caadada ii ahayd, maalintaas oo dhan waxaan fekaraba waxaan goostay in marka habeenkii la seexdo aan baxsado, lacagna aan ka furto guntiga eedaday.

Sidii ayaan yeelay, lacag ayaan kasoo xaday eedaday dani igu qabatay, ileen waa waa tii horay loo yidhi'''nafi orod bay kugu aamintaa''', kama aanan fekerin khatar ta jidka iyo bahalada duurka jooga, waxa ay himiladaydu ahayd inaan ka baxsado ninkaas oday odayga ah ee awoowaha ii noqon kara, iyo hoowsha badan ee aan qaban jiray, cuntana aan la igu siin jirin.

Goor ay saq dhexe tahay ayaan kasoo baxay guri baaskii, aniga oo aan cidi i ogayn, waxaan soo qabtay jidkii magaalada Laas-caanood; wax cabsi ah ima hayn, miyirna maba aan lahayn, waan iska socday mooyee wax aan socdaba waxaan soo gaadhay magaaladii -adii aan doonaayey aniga oo aanay wax dhibaato a dhibaato ah isoo gaadhin.

Intaan ilaahay u mahad celeiyey ayaan tagay Istaankii(Bosteejadii)baabuurta laga raacayey,si aan usoo raaco gaadhi xamar ku socda,nasiib wanaag waxaan helay gaadhi raran oo rabay inuu dhaqaaqo,gaadhigii ayaan soo raacay,intii yarayd ee lacagta ahayd ee aan haystayna isaga ayaan ku bixiyey.

wax lacag ah oo aan soo sahaydo ma aanan haysan,ma sahaybaan dan ka leeyahay awalba maanan cuni jirin cunto waabase maanta oo aan gaadhi dul saarnahay,inyar dabadeed gaadhigii ayaa ka dhaqaaqay istaankii,markii aan arkay gaadhigii oo socda ayaa miyir iigu horaysay,waxaan ka walwalsanaa in la iga daba yimaado hadase waan hubsaday in qorshahaygii ii hirgalay,walwalkii badnaa ee i hayey baa iga kala yaraaday,hase yeeshee fekor igama maqnayn oo waxaan kasii fakaraayey marka aan xamar tago cida aan miciinsan doono wax aan soconaba waxaa la gaaray waqtigii qadada,waxaana laga qadeeynaayey magaalad Garoowe.

Aniguse maanan haysan wax aan ku qadeeyo iyo wax lacag ah toona,islaan ka mid ahayd rakaabkii gaadhiga saarnaa ayaa ii yeedhay,oo i tidhi hooyo kaalay ila qadee



in kasta oo aan markii hore is adkeeyey hadana waan ka aqbalay,markaan ka farxalanay qa qadadii ayay waraysi igu biloowday,waxaan uga waramay taariikhdaydii oo dhan iyo wixii dhibaato soo maray,markaasay igi tidhi oo hada xamar yaa kuu jooga oo aad ugu socotaa? waxaan u sheegay inaanay cidi ii joogin xamar,cid aan ka garanayaana aanay jirin

Waxay i waydiisay magacayga,markaan u sheegay ayay iyana ii sheegtay in magaceeda Faadumo la yiraahdo,waxaa kale oo ay ii sheegtay inaanay xamar guri ku lahayn hase yeeshee ay u timi arimo uga xiran awgood ayna ku dagi doonto guriga walaalkeed leeyahay.

Waxayna iga balan qaaday inay i gayn doonto guriga walaalkeed haddii Rabi idmo inta aan safarka ku jirnanan aan iyada wax la qabi doono.

Wax aan soconaba wax aan marba meel wax ka cunaba waxaan soo galnay magaalada xamar run ahaantii markii aan soo galnay magaalada waxaan bilaabay in aan daawasho ugu dhaqaaqo quruxda iyo qaabka magaalada kaasoo aad ii cajab geliyey ;waxaan mar kaliya dareemay farxad,waxaan iloobay walwalkii iyo murugadii

i haysay, waxaan marba isha la raacayey daaraha quruxda badan iyo, laamiyada faraha badan iyo baabuurta kala jaadjaadka ah ee dhex qulqulaayey magaalada, ugu dan bayntii waxaan tagnay istaankii gaadhiyada waxaan kasoo baxday gaadhigii aan saarnaa aniga oo aad u fir firceen, waxaan isa soo raacnay faadumo oo ahayd islaantii aan gaa-dhiga isku soo baranay, markaan wax yar socanay ayay faadumo tagsi gacanta u taagtay, tagsigii ayaanu raacnay, inkasta oo ay ahayd maalintii iigu horaysay ee aan raaco gaadhi noocaas ah, waxaanu soo gaadhnay gurigii ay faadumo deganaysay, iridii ayay garaacday waxaana naga furay nin aanan anigu garanayn hase yeeshee ay faadumo garanaysay, aqalkii a ayay horay u gashay, aniguna waan daba galay waxaan horay u galnay aqal daar ah oo aad u qurux badnaa.

Waxaa halkaas nagu soo dhaweeyey faadumo walaalkeed iyo xaaskiisa iyo carruur yar yar oo ay dhaleen, markii ay is waraysteen reerkii ayuu faadumo walaalkeed yidhi:- oo faadumo waa tuma gabadhan yar ee kula socotaa maad noo sheegtid? oo aad na bartid, faadumo ayaa tidhi: walaal gabadhani waa gabadh aan jidka isku soo baranay, magaceeda waxaa la yiraahdaa Haweeya, waxayna rabtaa inay joogto xamar, waxayna horay iigu soo sheegtay inaanay wax dad ah u joogin xamar, marka aniga ayaa ku idhi waxaan ku gaynayaa guriga



Walaalkay, sidaas ayaanan idiinku keenay, faadumo ayaa igu soo jeesatay, markaasay igu tidhi haweeya ninkani waa walaalkaygii aan kuu sheegayey, magaciisana waxaa la yiraahdaa Xasan, gabadhana isaga ayaa aabe magaceedana waxaa la yiraahdaa xaali, markii la iskeen baray ayay xaali istaagtay, oo guriga dib ugu noqotay, waxyar kadib ayay ii yeedhay, waxayna i siisay dhar iyo saabuun, iyada oo iisii tilmaamaysa suuliga (Musqusha) markii aan soo maydhay ayayisoo hor dhigtay casho aanan weligay cunin, markii aan cashadii cunay ayay ii furtay qol waxayna igu tidhi caawa laga bilaabo qolkaas ayaad seexanaysaa,

Sidii ayaan yeelay waayo waxaan dareemayey daal faro badan, iyo hurdo aad ah, markii uu waagii baryey ayaan kasoo toosay hurdadii aniga oo dareemaya nasasho aan u baahnaa.

Markii ay haweeya halkaas marinaysay sheekadii ayuu farxaan saacadii eegay, haweeya way garatay in farxaan aad u dog-dogsan yahay, rabana in sheekaduu usii socoto oo uu aad u xiisaynaayo, kana xishoonayo inuu yiraahdo waan tagayaa.

Haweeya intii ay sheekaynaysay way ilmaynaysay iyada oo ka xun xusuusta uur ku taalada loh ee ay gocanaysay taariikh baaskii ay soo martay, farxaan qudhiisu caloosha ayuu ka ooynaayey, ilmaduna labada baal ayay ka saarnayd inyar ayuuna isku celinaayey.

Markay arini halkaas marayso ayay haweeya ku cudur daaratay inay xanuun dareemayso, sidaas daraadeed aanay sheegkada usii wadi karin, waxayna u balan qaaday inay mar kale u dhamayn doonto hadii Rabi idmo,

Farxaan ayaa intuu istaagay nabad gelyeeyey haweeya, kadibna irida ayuu ka baxay Farxaan wuxuu ogaaday taariikhda haweeya Waxaa kale oo uu ogaaday in haweeya aanay lahayn ciirsi(miciin) aan ahayn isaga iyo Illaahay,

Mar labaad ayuu eegay saacadii ku xirnayd gacantiisa, wuxuuna ka akhristay 11:00 subaxnimo, si deg-deg ah ayuu uga soo baxay cisbitaalkii, wuxuuna furaha ku fogay gaadhigiisii, una soo jiheeyay wakaalada hoowlaha maraakiibta, si uu u ogaado markab ay alaabo ula socotay waqtiga uu imanaayo, markii uu tagay wakaaladii war sugan ayaa laga soo siiyey, waxaana loo sheegay in markabkii uu dhawaan iman doono?

Qadar daqiiqado ah kadib farxaan wuxuu kasoo baxay wakaaladii, wuxuuna soo qabtay bakhaaro uu aabihii lahaa si uu usoo kormeero sida ay hoowshoodu u socoto, iyo inuu ka helaayo meel uu dhigo alaabada usoo degaysa



Wuxuu u yeeray dhowr xamaal oo meesha ka dhawaa wuxuuna ku amray in ay alaabta isugu geeyaan hal bakhaar, goortuu arkay in howshii isugu duba dhacday ayuu u yeeray nin masuul ka ahaa bakhaaradaas, wuxuuna udhiibay xoogaa lacag ah oo uu ugu talo galay shaqaalaha,

Markiiba gaadhigiisii ayuu kusoo dhacay isaga oo ay maskaxdiisa ka guuxayaan hadaladi uur ku taalada lahaa ee ay haweeya ku tidhi wuxuu soo maray dukaan lagu iibiyo dharka wuxuu usoo iibiyey dhar ay isaga badasho dharkii waqtida badnaa ee jeexjeexmaa, waxaa kale oo uu usoo gaday waxoogaa cuno qasacadaysan ah iyo sharaab iyo qado, wuxuuna soo

abaaray cisbitaalkii, markay haweeya aragtay farxaan oo alaab u sida soona noqday way u qaadan waysay, oo wayba la yaabtay!! dhana way ka faraxday, waxay lasoo booday oo maxaa ku dhibay oo aad xiligan isu soo dhibtay

farxaan ayaa ilko cadeeyay, wuxuuna yidhi waxba maaha walaal ee hoo alaabtan, galabta ayaan kuu soo noqonayaa ee nabadeey.

gurigiisii ayuu tagay wuu qadeeyey, wuxuuna isku tuuray sariirtiisii, waxa uu maalintaas oo dhan ka fakarayey sida uu haweeya u meelayn lahaa, una xanaanayn lahaa, ugu danbaytii wuxuu go'aamiyey inuu haweeya ka soo saaro cisbitaalka, keenana gurigiisa.

00 uu ku xanaaneeyo ilaa inta ay ka kab

nayso, waxoogaa ayuu seexday markii uu

hurdadii galabnimo kasoo toosay ayuu u qalab qaatay inuu aado cisbitaalka, si uu uga soo saaro haweeya, markii uu soo gaadhay qolkii ay haweeya jiiftay ayuu indhaha ku dhuftay haweeya oo isbadal wayni ka muuqdo wejigeedana uu ka muuqdo qurux iyo iftiin gaar ah, wuxuu si buuxda u dheehday oo uu indhaha ka buuxsaday indhaheeda waaweeyn ee la moodo karbuunada qofkii ay ku eegtaana ay hubaal tahay inay qalbigiisa waxyeelo u gaysanayso, sanqaroorteeda shuban, iyo qoorteeda cabaadhyuhu ku daliigan yihiin, waxaa kale oo uu isha la raacay caab dhismeedka jidhkeeda, walow ay jiiftay hadana quruxi kama madhnayh, waxaa quruxdeeda dhimaayey diiftii iyo darxumadii ha haysatay oo ka muuqday jidhkeeda,

Farxaan wuxuu horay usoo galay qolkii, wuxuuna soo dul istaagay haweeya oo saaran sariirteedii, bariido dabadeed wuxuu u sheegay inuu rabo inuu cisbitaalka ka saaro, haweeya hadalkaas aad ayay ugu riyaaqday, waxayse shaki ka qabtay wiilkan kool koolinaaya iyo booqashadiisa is daba joogga ah ee habeen iyo maalinba garab fadhiy iyo ula jeedada ka danbeeysa hadaladiisan naxariista leh!!



Haweeya oo in mudo ah aamusnayd oo ay qalbigeedu kusoo dhacayeen hadalo iyo fikrado kala jaad-jaad ah ayaa go'aan ku gaartay in ay hadalka farxaan iska yeesho, iyada oo niyada iska leh ma awal taad haysatay cid kuu dhaanta, farxaan oo weli fadhiya jawaabna ka sugaya haweeya ayaa dareemay in haweeya laba qalbisan tahay, wuxuuna ku yidhi:-

Maxaa ku helay walaal ee aad la fakaraysaa, ma waxaad diidan tahay inaan cisbitaalka kaa saaro? mise wax kale oo aad iga qarinaysid ayaa jira? haweeya oo kusoo baraarugtay hadalka farxaan ayaa ku cudur daaratay waxba ima helin, waxbaa kama fakarayo ee ana wad ininkaba diyaar ayaan ahayee.

'''Farxaan ayaa yidhi''' i yara sug aan lasoo hadlo dhakhtarka lana socodsiyee waxay ugu jawaabtay ' 'waa yahay''' farxaan baa is taagay wuxuuna aaday xafiiskii dhaqtarka, wuxuuna la kulmay dhakhtarkii, wuxuuna usoo bandhigay ujeedadiisii, dhakhtarkiina wuu ka ogolaaday, wuxuuna u qoray daawooyin faro badan, wuxuuna yidhi'''daawooyinkaan ha qaadato, waxaadna nagu soo celisaan 25casho kadib si aan u ogaano inay kabantay iyo in kale

4'''farxaan ayaa yidhi waayahay ditoore,waad mahadsantahay''',wuxuuna dib ugu soo noqday haweeya,uguna bish-aareeyey ogolaanshihii dhakhtarka,waxaa se mashaakil ku noqday markuu arkay in aanay haweeya socon karin,inta uu yidhi '''isii yara sug''' ayuu usoo yeedhay dhowr kalkaaliye oo shaqaalihii cisbit-aalkaka mid ahaa oo meel aan ka dheerayn Joogay.

Salaan guud ayuu wada salaamay,wuxuu-na ka codsaday inay gacan ku siiyaan si uu ula baxo gabadh jaban oo qol aan ka fogay ku Jirta,wayna ka aqbaleen,waxayna soo qaateen sariir yar oo loogu talo galay dadka jaban ama jiran ee aan socon karin,farxaan oo hogaaminaaya kooxdii kalkaaliyeyaasha ahaa ayaa soo galay qolkii ay haweeya jiiftay, Markiiba si ay ku jirto karti iyo taxadir ayaa loo qaaday haweeya.

Farxaan isagu kuma jirindadka haweeya wax ka qaaday,ee wuxuu ku mashquulsanaa ururinta alaabo yar yar oo ay haweeya lahayd oo dul saarnayd sariirta iyo koomadiinkeeda



Kolkuu ururiyey alaabtii ayuu ku guray bac yar oo meesha tiilay,markaasuu ka daba baxay kooxdii kalkaaliyeyaasha ahaa ee haweeya wad-ay,wax la wada socdaba waxaa laga wada baxay iridii weeynayd ee cisbitaalka Digfeer.

'''Farxaan ayaa dadkii ka hormaray si uu u tuso gaadhiga una sii furo''',goortii ay ay kalkaaliyeyaashii ku hubsadeen haweeya gaadhigii,ayuu farxaan uga mahad celiyey sidii wanaagsanaad ee ay uga qayb qaateen soo saarista haweeya?iyaguna waxay ugu jawaabeen Ilaah baa mahad leh ee nabad gelyo haweeyana waxay u rajeeyeen caafimaad qab.

Farxaan markiiba gaadhigii ayuu usoo galay gudaha,wuuna dhaqaajiyey isaga oo u jihaynaya dhanka xaafada Kaasa-Balbalaare oo ahayd xaafada uu daganaa farxaan,intii ay jidka kusii jireen haweeya waxay ka yaabanayd sida wiilku isugu mashquulinayo raali gelinteeda.

44waxaa kale oo ay ka fakaraysay marka uu geeyo aqalka uu sheegayo cida gaadhiga ka

dejinaysa oo sidii hada oo kale ugu gurmanaysa,iyo waxa ay kala kulmi doonto aqalka aqalka loo wado.

'''waxaa kolba maskaxdeeda kusoo dhacay dhacayey hirar iyo moowjado kala duwan oo midba dhan u socdo''',iyada oo sidii u mashquulsan ayaa lasoo gaadhay gurigii farxaan ayaa hoonkii gaadhiga yeeriyey waxaana ka furaywaardiyihii guriga,oo magaciisa la oran jiray "Xaashi",xaashi wuxuu markiiba isha ku dhuftay gabasha saaran gaadhiga,wuxuusa ka yaabanaa waxa ay tahay Ileen horay uma aanuu arkin farxaan oo gabdho keensanaaya gurigooda,wuxuu ogaa farxaan inuu yahay wiil dagan oo edeb leh,oo aan ku kicin falalka noocaas ah.

Xaashi wuxuu go'aansaday inuu u dhabo galo xaqiiqadu waxa ay tahay,wuxuu markiiba xidhay ganjeeladii,wuxuuna ag fadhiistay jardiino ku ag tiilay ganjeelada,isaga oo weli isha lasii raacaya farxaan,farxaan gaadhigii ayuu kasoo dagay,irida ayuu ka



Furay haweeya,wuxuuna u yeedhay xaashi si uu ula kaalmeeyo soo dejinta haweeya wax yar kadib haweeya waxaa la keenay qolki loogu talo galay.

''haweeya markay soo gashay qolka waxay la yaabtay quruxda qolka,iyo qalabka yaal oo aad u cajab geliyey!'.

Farxaan iyo xaashi markii ay ku hubsadeen sariirteedii ayay kasoo wada bexeen qolkii,farxaan wuxuu dib ugu noqday gaadhigii, si uu uga soo dejiyo alaabo yar oo ka saarnayd haweeya,wuxuuna mar labaad kusoo noqday qolkii,isaga oo sida alaabtii wuxuuna la socodsiiyey inuu baxayo,mar dhawna usoo noqonaayo,haweeya oo u riyaaqaysa hadaladaas ayaa ku tidhi waa tahay

farxaan markiiba wuu baxay wuxuuna tagay farmashiye agtooda ahaa,wuxuuna kasoo iibiyey dawooyinkii loo qoray haweeya oo dhan qadar daqiiqado ah kadib wuxuu kusoo noqday gurigii,markuu irida kasoo galay ayaa waxaa hadal ku bilaabay waardiyihii,wuxuuna ku yidhi,haye farxaan

Maxay tahay gabadha aad caawa noo keentay?maxaase kaga dhacay lugta ay ka duuban tahay?

'''Farxaan oo ay daganaani ka muuqato ayaa wuxuu ku jawaabay adeer gabadhu waa gabadh soomaaliyeed,dhaawaca ka muuqda waa mid aan anigu u gaystay,oo xalay ayaan gaadhiga jiidhsiiyey,oo aniga oon filayn ayay igusoo hor carartay,markaa lugta aad u jeeddo gaadhigayga ayaa ka jabiyey'''.

Xaashi ayaa farxaan weeydiiyey oo miyaanay gabadhu dad lahayn,farxaan oo aad moodo inay su'aashaasi dhibayso ayaa yidhi maya adeer waxay ii sheegtay inaanay magaalada wax ehel ahi u joogin,oo hada waa maxay alaabadan aad sidaa adeer?farxaan baa ku jawaabay adeer waa dawooyin uu dhakhtarku usoo qoray,hadaba dhaqso oo dawooyinka u geey gabadha.

Farxaan baa gurigii horay usii gaday wuxuuna u tagay hawecya oo ku jirta qolkii uu kaga tagay,intuu u dhiibay dawooyinkii



Oo dhan ayuu u sheegay sidii loo isticmaali Lahaa,haweeya waxaa wejigeeda ka muuqday xishood aad ah waana markii ugu horaysay oo ay wiil gayaankeed ah isku kaliyeystaan, waxayna ka fakaraysay sidii ay isu iloowsiin lahayd xishoodka faraha badan ee ka muuqday wejigeeda.

'''Farxaan qudhiisu wuu dareemay inay haweeya xishoonayso,wuxuuna u qalab qaatay sidii uu uga bi'in lahaa asmuskan faraha badan iyo eegmada la isku xadaayo labada dhan wuxuuna hadalkiisii ku bilaabay''':-

Walaal waxaan doonayaa inaad ii dhamaysid sheekadii aad saaka ii waday,haweeya ayaa bilowday sheekadii,waxayna tidhi:-

Waataan kuu sheegay in nin xasan la yiraahdo oo qabo naag xaali la yiraahdo gurigooda la i geeyay,gurigaas oo ku yiilay xaafada xamar jadiid,waxaa aqalkaas ku noola reerkaas oo kaliya,reerku waxay dhaleen dhoowr caruur ah,waxayna ~~dhakkaan~~ ugu weynaa wiil da'aadaadaas oo kale ah lana

Oran jiray Axmad,waxaan reerkaas la
joogaba oo aan sidii jaariyada oo k
kale ugu shaqeeyo waxaa dhamaaday hal
sano anaga oo sidii u wada nool,ayaa
maalin maalmaha ka mid ah aniga oo guriga joog
jooga waxaa ii yimi wiilkii axmad ahaa
ee reerka curadka u ahaa,wiilku wuxuu
ahaa wiilasha xun xun ee laga cawdu bil-
aysto,wuxuu ahaa wiil aan waxba u kala soo-
cnayn,wuxuu isticmaali jiray waxyaabaha
dooriya maskaxda,hadaba maalintaas aan
sheegayo waxay ahayd maalintiisii oo wuu
cabsanaa,aniga oo aqalka iridiisa hore
fadhiya kaligay,reerkii aqalka lahaana ay
maqan yihiin,ayuu isoo dul istaagay,markii-
ba waan gartay inaanuu caadi ahayn oo uu
cabsan yahay,wuxuuna igu yidhi haye abaayo
maxaad meesha la fadhidaa kaligaa,waxay
ila tahay in maanta labadeena loo faaruqiyey
guriga,sow sidaas maaha?mar alla markaan
maqlay hadaladaas ee aan ogaaday inuu cab-
san yahay oo aanuu caadi ahayn ayaan orod
labada tafood xaytay,oo aqalkii ayaan dib-
ada uga baxay,waxaan istaagay banaankii,i
ileen ma aqaano meel kale oo aan aado



Waxaa goor danbe meeshii iigu yimi reerkii
guriga lahaa,odaygii baa igu yidhi maxaa
adeer meesha ku taagay kaligaa?aniga oo
cabsanaaya,waxaan ku jawaabana garan l'a
ayaan ku cudur daartay inaan daawanaayey
baabuurta jidka maraysa,waxaan soo galay
aqalkii iyada oo ay i daba socdaan xasan
xaali,iyo caruurtoodii yaryaraydl,markii
aan aqalkii fooda soo galinayba axmad ayaa
iga soo hor booday oo cunaha i qabtay isaga
oo iigu hanjabaya naa maxaan amaan kaaga
waayey?bahal yahay xumee qaxootiga ah,adiga
oo shalay xamar soo galay miyaad doonaysaa
inaad gurigeena naga saartid?

'''isaga oo weli cunaha i haya,hadala-
daasna iigu hanjabaya ayaa waxaa iga fur furay
furtay xaali,kolkii la iga furfuray ayaa
aniga oo aanay nafi igu jirin ku tiirsaday
gidaar ii dhawaa''',xaali ayaa bilowday
inay wiilkeeda waraysato si ay u ogaato
waxa na dhex maray aniga iyo isaga,markiiba
sheekadii wuu badalay ileen waa nin ciil ii
qabee,wuxuuna yidhi:-

''Gabadhaan guri danbe oo aan leenahay kuma arki karo''maxaa yeelay waa gabadh xun oo ciyaalo suuqad ah maanta markii aad baxdeen ayay iyana baxday,mar dhawayd ayay timi iyada oo wadata wiil aan suuqa ku arkay oo aan u malaynaayo inuu yahay xamaal,wiilkii siday guriga isula galeen goor dhawayd ayay kasoo baxeen,markaan idhi naa maxaad sidaas u yeelaysaa cay ayayba iila soo joogsatay,aniguna guriga ayaan ka eryay,waana tan markay idin aragtay idin soo daba gashay.

Markii ay hadaladaas dhagahaygu maqleen ayaan oohin is celin waayey,oon af labadii yeedhay,aniga oo raba inaan runta shaaca ka qaado ayaa waxaan arkay xaali oo ul igula soo socota.

waxaan isku dayey inaan carraro nasiib daro axmad ayaa isoo qabtay,halkii ayaana la igu dilays si xun,oo meel la ii dhaafay ma jirin,xasan ayaa isku dayey inuu iga qabto wuuse ku guulaysan waayey.

Xaali ayaa intay jiniyo isku riday tidhi ha la iiga saaro gurigayga,guri aan leeyahayna kuma arki karo.



sidaas ayaan uga soo baxay gurigii iyo reerkiiba,markaan banaanka uga soo baxay gurigii ayaan dhinacyadayda ceg cegay,waxaan garan waayey meel aan u dhaqaaqo,aniga oo weli meeshii taagan ayaa waxaa jidka soo maray gabadh dariskeena ahayd lana oran jiray Xaliimo.

'''Xaliimo waxay ahayd gabadh wanaagsan oo aan ugu jeclaa gabdhaha xaafada ila dagaana,waxaan uga waramay dhibaatada i haysata iyo waxa iga soo waday reerkii aan la noolaa nasiib daro xaliimo ma aanay awoodin inay gurigooda i gayso waayo hooyadeed ayaa ahayd islaan kulul,oo aan ogolayn in gabadheeda ay gabdho u yimaadaan iyo inay u tagtoba.

Xaliimo ayaa igu tidhi walaal waad ogtahay oo anigu gurigeena kuma gayn karo oo hooyaday ayaan kuu ogolaanayn,muslinkaaga Ilaahay hakuu sakhiro oo iska dhex gal.

Sidaas ayaan uga soo tagay xaafadiii X/jadiid ahayd,aniga oo aan garanayn meel

aan u socdo iyo meel kaleayaan soo dhaqaaqay aniga oo jidhka oo dhami i damqanaayo,madaxuna uu aad ii xanuunayo indhahana aan wax aad ah ka arkayn oo meel aan u ciirsado la',magaalada xamarna marba dhan u raacaya ayaan is idhi laamiga ka gudub,dabadeedna gaadhigaagii ayaa i jiidhay.

'''Farxaan wuxuu ka yaabanaa dhibaatada adag ee lasoo kulantay haweeya iyo sida ay ku kulmeen ee uu Ilaahay ugu sababay gaadhigiisa,ayuu saacadii eegay,wuxuuna ka akhriyey 9:15daqiiqo'''.

Wuxuuna ku yidhi walaal waxaan filayaa hurdo u baahan tahay ee iska seexo.

Haweeya oo ay hurdo aad u hayso ayaa tidhi farxaanoow waxaan ku waydiinayaa su'aal ee ma iiga jawaabaysaa,farxaan ayaa lasoo booday haa walaal,isaga oo niyada iska leh toloow maxay tahay su'aasha ay ku waydiinaysaa,adigu miyaadan lahayn hooyo,aabo,iyo walaalo?yaase kugula n ol gurigaan wayn?



Aankuu waramee hooyaday iyo aabahay way nool yihiin,waxayna dalxiis ugu maqan yihiin

dalka maraykanka,mar dhawna waxaan filayaa inay yimaadaan,wax walaalo ahna waxaan leeyahay wiil iyo gabadh waxayna waxbarasho ugu maqan yihiin roomaaniya,taas ayaana keentay inaan kaligay guriga ku noolaado ilaa inta a y hooyo iyo aabo ka imanayaan.

'''farxaan intuu istaagay ayuu garabka ka dhirbaaxay haweeya,isaga oo leh waan seexanaya ee habeen wanaagsan''';

Sidaas ayaa habeenkaas lagu kala seexday Haweeya waxay la fajacsanayd nasiib wanaageeda iyo shimbirkan Ilaahay usoo diray,waxay soo xusuusatay habeenkii ay la'ayd meel ay u ciirsato ee gaadhigu jiidhay,waxay is barbar dhigtay habeenadii soo maray noloshooda iyo habeenkan caawa ah sida ay ku sugan tahay waxay mahad u celisay Ilaahay,sidiix ayayna ku seexatay habeenkii,markuu waagii baryey ayay soo fadhiisatay,waxayna isku dayday inay socon karto,nasiiba daro way u suurtoobi wayday inay socoto,intay kusoo noqotay sariirtoodii

Waxyar kadib farxaan ayaa usoo galay wuxuuna ka waraystay xaafimaadkeeda waxayna u sheegtay inay ladan tahay oo ay doonayso inay banaanka ku neecawsato markiiba inta uu garab galay ayuu u saaray aqalka barandadiisa.farxaan wuxuu bihaabay inuu labisto,intii uu labisanaayey ayay gabadhii jaariyada ahayd u diyaarisay quraacdii,una saartay miiskuu,farxaan mark-uu diyaar noqday miiskii ayuu soo dul fadhiista si uu u quraacdo.

Sucaad ayuu u yeedhay,wuxuuna ku yidhi sucaaday walaal u yeedh gabadha banaanka fadh-ida soona garab gal,sucaad amarkii ayay u qaa-datay sidii loo faray,markii ay haweeya soo dul istaagtay miiskii quraacda ayuu farxaan ku yidhi maad soo fadhiisatid maxaad sugaysaa haweeya oo ka xishoonaysa inay hor fadhiisato oo ku hor quraacato ayaaku fadhiisatay kursi meesha yiil,waa markii ugu horaysay oo cunto loosoo kariyey la yidhi cun ,waxay niyada iska tidhi allaylehe irid khayr qabta ayuu Ilaahay kuu furay,markay bilowday cuntadii ayuu farxaan dareemay inay ka xishoonayso,wuxuuna kula kafta



waxba aniga ha iga xishoon ee dhaqso u quraacc maanta laga bihaabo halkan ayaad wax ku cun-aysaa aniga oo kuu jeeda ee sidee baad yeeli ma xishood uun baad ku jiri?haweeya ayaa dhoolo cadaysay,markaasay ku tidhi mayee waan kaa boobi,markii la wada quraacday ayuu far-xaan istaagay si uu u baxo,wuxuuna haweeya la socodsiiyey inuu baxayo oo uu aadayo shaqadiis-sa,wuxuuna u yeedhay sucaad oo ahayd jaariyad ii aqalka wuxuuna ku yidhi sucaad anigu waan tagayaa ee usii sheekee gabadhan martida ah una samee wixii ay kaaga baahato.

Farxaan wuu baxay,waxaana gurigii kusoo haray Sucaad Iyo Haweeya,sucaad ayaa bilowday inay waraysato haweeya,waxayna hadalkii ku bilowday sidan:-

Sucaad: abaayo magacaa?

Haweeya:"walaal magacaygu waxaa la yiraahdaa Haweeya"

Sucaad: baracsho wanaagsan aniganа sucaad baa la i yiraahdaa,waxaanan ahay gabadha ka shaqaysa aqalkaan.

Haweeya oo maanta oo dhan ka fakaraysay gabadhan aanay xalay arag ee ay saaka ugu soo toostay guriga ayaa hadalkii qaadatay,waxayna tidhi:-

Haweeya: oo walaal maxaan kuu arki waayey xalay?

Sucaad: Abaayo anigu halkan ma seexdo ee subaxdii halka saac ayaan shaqada soo galaa,makhribkiina waan ka ba baxaa, sidaas ayaanu isu arki weynay xalay.

Sucaad oo weli hadalkii wadatta himiladeeduna tahay inay ogaato waxa haweeya meesha keenay ayaa waraysi mar labaad ku bilowday haweeya iyana si faah faahsan ayay uga faalootay taariikhdeedii oo dhan.

Wax sidaas lagu wada noolaadaba,wax maalinba maalin gurtaba waxaa lasoo gaadhay maalintii lagu balansanaa in haweeya la geeyo dhakhtarka,si loo ogaado inay kabantay iyo in kale.

Subixii markuu waagu baryey ayay kasoo toostay hurdadadii,iyada oo uu ka muuqdo isbadal wa



Muuqaalkeedii iyo midabkeedii casaa ee sanad ka hor qayirmay uu isbadal wayni ku dhacay,jidhkeedii ay waydu(Caato) iyo darxumadu badashay oo buuxsamay,haweeya waxay heshay nafaqo iyo xanaano heer sare ah,waxaa soo if baxay quruxdeedii dabiiciga ahayd,waxaa la moodayey biyo dahab,waxaa soo iftiimay wejigeedii,waxaa hilibaystay jidhkeedii kale.

'''Subaxdaas waxaa haweeya wajigeeda ka muuqday bilic gaar ah'' iyada oo ku faraxsanayd kabka laga furi doono qadar saacado ah kadib kadib,waxaa marba hor imanaayey iyada oo ku laafyoonaysa lugaheedii,markiiba way diyaar garoowday,farxaana sidoo kale ayuu diyaar u noqday,gurigii ayaa laga soo wada baxay,waxaana la aaday cisbitaalka guud ee digfeer markay soo gaadheen ayay gaadhigii kasoo wada degeen,waxayna horay u galeen cisbitaalkii

nasiib wanaag haweeya lugtii way u kabantay, kabkiina waa laga furay,waxyar kad ib waxaa itida cisbitaalka kasoo baxay haweeya iyo farxaan oo wada socda,isuna jiibinaaya qosol iyo sheeko,waxay kusoo dhaceen gaadhigii

Haweeya waxaa ka muuqday waji furnaan sheeko iyo qosol badan oo aan kala go' lahayn,farxaan wuxuu aad uga yaabay farxada ka muuqata iyo sheekada badan ee kasoo hartay.

'''wax qosol iyo sheeko la isku waalaba waxaa lasoo gaadhay gurigii'''haweeya gaadhigii ayay kasoo dagtay,farxaana dib ayuu u laabtay si uu u aado shaqadiisii.

wax sidaas lagu wada noolaadaba maalmi badan haweeya quruxdeedii maalinba maalinta ka danbaysa ayay soo if baxaysay.

'''Farxaan waxaa markaan soo galay jiro uu garan waayey dawadeeda''' wuxuu isku arkay inuu jecel yahay inuu haweeya mar walba la sheekayst

oo uu had iyo jeer ag fadhiyo,markuu shaqada aa wuu dhibsadaa,wax uu sidaas ahaadaba farxaan wu is hayn kari waayey,wuxuu go'aan ku gaaray inuu haweeya u dan sheegto una sheego jacaylka uu u qabo,waxay arini sidaas ahaataba goor galab aha farxaan u yeeray haweeya oo waraabinaysa jardii aqalka,haweeya si deg deg ah ayay u tuurtay tub



ay wax ku waraabinaysay,farxaan wuxuu ka yaabanaa oo niyadiisa ka go'i weeysay dhago nugaylka gabadha iyo sida ay u tix galinayso hadalkiisa markiiba inta ay u timi ayay ku tidhi walaal maxaan ku siiyaa?farxaan ayaa wuxuu ku marmarsiyoodo garan waayey wuxuuna ku yidhi walaal koob shaaha ii keen.

Gurigii ayay dib ugu noqotay,waxayna ua keentay koobkii shaaha ahaa,farxaan shaahii ayuu ka gudoomay haweeya,iyana shaqadeedii ayay ku noqotay;farxaan wuxuu fiirinaayey sida ay wax u qabanayso iyo hoowl karnimadeeda.

farxaan markuu dhoor jeer kabaday shaahii ayuu mar labaad u yeedhay haweeya wuxuuna ku yidhi fadhiiso,wuxuuna hadalkii ku bilaabat-

Farxaan:
Haweeyaay walaalay
Haybadlayda lumarkaay
Haldhaa quruxleeyeey
Haydaarada aduunyada
Hilin wareega weeyee
Hal yaroo naftaydii
Hayjad adag ku oogoo

Hani igu abuuray
Hurdana ii diiday
Hanfi duula iga dhigay
Hadii aan garsoore iyo
Garyaqaanba kaa dhigo
Sidee baad u goyn lahayd

Haweeya: Walaalkay farxaanoow
Sankuneefle oo idil
Kaan ugu jeclaayoow
Midka aanan huraynoow
Arxan badanihiiyoow
Wehelkii naftaydoow
Walwal gooyihiiyoow
Wareerkan habeenadan
Soo wajahay naftaydii
Ana tayda saanees
Sidii aan u goyn lahaa
Aad iga gudoontidee
Soo gogoldhig xaajada

Farxaan: Gacaloooy haweeyaay hal
Halbeewlaha jidhkaygii
Hooy baad ku yeelatay
Howl yaraan ka dheeroo
Hadba sii fidaayee



Hamad gaara igu riday
Hadal iyo dhamaantii
Hada waan ku jeclahay
Ha u qaadan dheel dheel
Hani baa i dilayoo
Halisbaan ku joogaa
Hamigaygu waa
Hanashada naftaada
Hani gaaga uun baa halis igu abuuree
Hani baa i dilayoo
Halis baan ku joogaa
Hilinkeed i marinoo
Hubka aan u qaataa

Haweeya: Farxaanoow walaaloow
Fiiro dheerihiiyoow
Feejignaan yaqaanoow
Haddii uu jacayl adag
Kaa yeeshay darisoo
Kaa leexshay hilinkii
Hubka waxaad u qaadaa
Ruux kale inaysan
Hamadaydu raacayn
Hoog waataan ka qaadaa

Farxaan aad ayuu u farxay markuu maqlay hadaladaas kasoo burqanaya haweeya afkeeda,falaadh ku taagnayd maalmahaan ayaa ka go'day,awalba wuu ogsaonaa inaanay haweeya waxba ka diidayn,oo ay gacantiisa ku jirto,hadana ay arini noqotay sidii uu filaayey.

''halkaasay galbtaas ku gudoomeen inay dhidibada u aasaan jacaylkooda'' an lagana faa'iidaysan dhexdooda wax kasta oo dhaca.

Goor duhur ah ayuu farxaan haweeya ku war galiyey in ay caawa magaalada isu raacan haweeya aad ayay uga heshay hadalkaas,una xiiso galiyey,waxaa la gaadhay xiligii balantu ahayd,waxayna u alabqaateen sidii ay isu diyaarin lahaayeenwaxay kasoo wada bexeen gurigoodii, waxayna soo abaareen dhankii magaalada,farxaan habeenkaas himiladiisu waxay ahayd inuu usoo iibiyo haweeya dhar,iyo wixii kale ee ay u bahantahay.

Markay dhamaysteen waxyaabihii ay iibsanaayeen ayuu farxaan gaadhigii dib u majiiray



waxayna tageen baar kamid ah baarka maga aalada xamar ugu caansan si ay uga soo cashbeyaan,

Haweeya waxaa aad u xiiso galiyey qur-uxda baarka iyo dhirta ka baxaysay ee kala jaad-jaadka ah,intii cuntada loogu maqnaa haweeya waxay ku maqnayd daawashada baarka

Farxaana wuxuu ku maqnaa daawashada haw-eeya,run ahaantii haweeya qofkii habeenkaas arkaa kama aanuu sii jeesan karayn,farxaan waxa uu niyada iska lahaa allaylehee tani waa x' xuural cayntii la sheegaayey''

Waxyar kadib waxaa loo keenay cashadii hawyya waxay u ahayd habeenkii ugu horeeyay noloshceda ee ay baar wax ka cunto in kasta oo uu xishood ku jiray hadana way is adkaynaysay,markii laga farxashay cashadii ayay soo qabteen dhankii guriga Markay soo gaadheen gurigii ayay soo wada galeen qolkii fadhiga;si ay u wada sheekaystaan, wax jacayl la wada dhiso,lana axdi aan heowl yaraan lagaga gudbi karin

la iskana waaniyo sadexeeyaha kala eryа mataanaha is jecel,lana soo xusuusto qofkasta wixii soo maray wanaag iyo rafaadba,lana lafo guro sheekooyin aan dhamaad lahayn ayaa lagaaray waqti danbe,qofwalibana dareemay inuu u baahan yahay hurdo,waxaana la go'aansaday in la kala seexdo.

'''Habeenkaasi sidaas ayuu ku galbaday waxaa is guray waqtigii,saacadba saacad bay qaaday,maalinba maalin,biliba bil bay eri- day, waxaa dhamaaday afar bilood intii ay haweeya joogtay guriga reer warsame.

''' goor galab ah ayaa farxaan iyo haw- eeya oo wada fadhiya qolkii fadhiga ayaa waxaa soo dhacay taleefan,waxaana qabtay farxaan,markii uu ''Hallo'' yidhi waxaa loogu jawaabay cod farxad galiyey oo uu garanaayo,hadaba waa kuma qofkaas?

'''waa farxaan aabihii'''
farxaan ayaa salaan diiran u tabiyey salaan diiran,waxayna bilaabeen inay is waraystaan labada dhanba,wuxuuna u dhacay hadalkoodii sidan:-



Warsame: aabe waxaan doonayaa inaan ku ogay- siiyo inaan iman doono laba casho ka dib aniga iyo hooyadaa.

Farxaan: Aabe aad baan ugu faraxsanahay imaa- tinkiinaas,

Warsame: Farxaanoow aabe wax war ah maka hay- saa walaalahaa?

Farxaan: ''haa'' aabe malin dhawayd ayaan ka helay warqad waxayna iisoo sheegeen inay nabad ku ibaan,wax barashadoodii -na ay caadi ugu socoto.

Warsame: ''waa hagaag ee hooyadaa la hadal''

Maryan : Haye hooyo bal ii waran.

Farxaan: hooyo waa nabad iyo barwaaqo ee bal adigu ii waran.

Maryan: aniganana sidoo kale,farxaanoow hooyo waxaad igu salaantaa dadkii dariska ahaayo dhan,gaar ahaan islaantii Canbaro nuur ahayd,waxaa kale oo aad igu salaantaa qaraabadii oo dhan.

Farxaan: waayahay hooyo aniga ayaa kaa wada garrsiin doona.

Maryan : Nabadeey hooyo waan is arki doonaa.

Farxaan taleefankii ayuu is dul saaray markaas ayuu haweeya usoo jeestay,una sheegay inay hooyadiis iyo aabihiis iman doonaan,waxaa kale oo uu u sheegay in marka ay waalidkiis yimaadaan inay

uu usoo bandhigi doono arintaoda ayna aqal gali doonaan.

farxaan wuxuu cabsi ka qabay dhanka

aabihiis oo ahaa nin kululoo aanay ciyaar ciyaari agtiisa oolin,wuxuuna ku rajo waynaa inay hooyadii wax la qaban doonto oo ay ka damiinan doonto odayga,

'''waxaa la gaaray haalintii balantu ahayd''' farxaan iyo haweeya waxay bilaabeen inay u diyaargaroobaan si ay usoo dhaweeyaan warsame iyo maryan,mid waliba dhankiisa ayuu iska giijiyey,waxaana soo dhawaatay waqtigii ay dayuuradu soo cago dhigana lahayd gegida



dyuuradaha caalamiga ah ee magaalada muqdisho gurigii ayay kasoo wada baxeen waxayna soo abaareen dhankii garoonka dayuuradaha,markay soo gaadheen waxay u gudbeen dhankii qolka soo soo dhawaynta,waxba yaanan hadal kugu daalinnee waxaa soo cago dhigatay diyaaradii.

markiiba salaankii ayaa loo dhigay diyaaradii,rakaabkii saarnaa diyaarada waxay bilaabeen inay soo dagaan,farxaana wuxuu bilaabay inuu hooyadiis iyo aabihiis u ka dhex raadiyo dadka,nasiib wanaag wuxuu indhaha ku dhuftay hooyadiis iyo aabihiis oo is barbar socda.

Runahaantii aad ayuu ugu farxay,haweeya oo garab taagnayd ayuu korka ka tusay,farxaan markuu xaqiijiyey inay yimaadeen ayuu dibada uga soo baxay qolkii,waxayna ag istaageen gaadhigoodii oo yiilay dibada.

Markay waxyar taagnaayeen ayay indho indhceyeen dadkii kasoo baxaayey irida wayn ee garoonka,waxay indhahoodii qabteen warsame iyo maryan oo kasoo baxay iridii.

Farxaan markuu arkay hooyadiis iyo aabihii sidii wax waalan ayuu kusoo cararay oo kolba mid isku duubay, markii lakala bogtay ayaa loosoo dhaqaaqay dhankii gaadhiga, farxaan baa bilaabay inuu is baro haweeya iyo waalidkiis, si caadi ah ayuu isu baray isaga oon waxkale sheegin halkii ayaa la iska soo taacay, waxaa lasoo gaadhay gurigii, markiiba waxaa iridii furay Xaashi, gurigii ayaa horay loo galay, warsame iyo afadiisii (xaaskiisii) waxay u gudbeen qolkii fadhiga.

Farxaana wuxuu bilaabay inuu alaabtii ka soo dajiyo gaadhiga, haweeyana waxay fadhiisatay barandadii aqalka.

Farxaan isaga oo ku raran alaabtii ayuu galay qolkii fadhiga, halkaasoo ay fadhiyeen warsame iyo maryan, labadooduba aad ayay ugu baahnaayeen inay waraystaan wiilkooda iyo gabadhan la socotaa waxa ay tahay, waxaa hadalkii bilaabay warsame, wuxuuna yidhi:-

warsame: Farxaanoow aabe waa tuma gabadhan yar ee quruxda badan ee kula sodotaa?



Farxaan: Aabe gabadhani waa gabadh aanu is baranay dhawaan, waana ta kaliya oon ugu jeclahay aduunka inta gabadh joogta, waxaanan doonayaa inaad ii gurisaan.

Maryan : Ma xuma hadii aad keensatay gabadhan quruxda badan, oo aad jeclaysatay in aanu kuu guurino, laakiin is weeydii -ntu waxay tahay gabadhan reerkoodu makuu ogol yahay?

farxaan oo markuu hadaladaas maqlay falaadh af badan ayaa isku gilgishay, nabar waa hore bogsaday ayaa damqaday, wuxuu soo xusuustay sheekooyinkii haweeya uga sheekayn jirtay iyo rafaadkii iyo dhibaatadii ay lasoo kulantay, waxoogaa ayuu aamusnaa oon wax hadal ah afkiisa kasoo bixin, isaga oo aad moodo in biyo lagu rusheeyey .

warsame ayaa ka yaabay aamusnaanta wiilka markaasuu ku qayliyey isaga oo ay cadho ka muuqato, wuxuuna ku yidhi:-

Warsame: ''war maad ka jawaabtia su'aash lagu waydiiyey''maxaad la aamusan tahay inta aad marka hore hadal dadka

lasoo doonatay ayaadan hadana qancinayn.

Farxaan: oo kusoo baraarugay hadalkii aabihiis,kana baqaya cadhadii ka muuqatay ayaa yidhi:-

aabe gabadha labadeedii waalid way dhinteen ehel kale oo xamar u joogaana ma jiraan,

Warsame: oo ka shakiyey aamusnaanta farxaan iyo jawaabtiisii danbe ayaa yidhi yaa masuul ka ah oo aan ka doonanaa gabadha,farxaan oo ay ka muuqato

murugo;oo ay ku adagtahay ka jawaabida su'aashaas ayaa yidhi:-

Farxaan: ''cid ka masuul ah ma jirto;wuxuuna bilaabay inuu hooyadiis iyo aabihiis uga sheekeeyo taariikhdii haweeya iyo sidii ay isku barteen.

Warsame: oo sidee ayaad u xaqiijinaysaa in gabadha hadalkeedu run yahay iyo in kale,iyo inaanay ehel lahayn haddii ay gabadhani tahay gabadh khayr qabto ah maxaa reerkoodii kasoo kexeeyey?



isaga oo cadhaysan ayuu wiilkiisii ku yidhii i maqal wiil yahaw, waan ku ogahay oo heer baad gaadhay oo adiga ayaa is maamulaya,markaa anigu kaama yeelin qorshaha aad wadato,ee orod gurigayga iiga saar gabadhan aad la ordaysid.

Farxaan oo ka xumaaday hadalka aabihiis ayaa indhihiisa ilin isku soo taagtay,wuxuuna ka fakaaraayey hadii aabihiis sidaas kaga dhabeeyo halka uu gacaladiisa gayn doono,talo ayaa ku cadaatay,oo dhan ku u ciirsado ayuu

ggran waayey,hooyadiis oo meesha fadhiday dhagaysanaysayna doodii kululayd ee ka dhex socotay warsame iyo farxaan ayaa dareentay in wiilkeeda talo ka murugsan tahay,meel uu u baxana la' yahay,waxayna isku dayday inay odayga dejiso wiilkeedii ayay ku tidhi orod oo dibada u yara bax,farxaan sidii buu yeelay oo aqalkii ayuu dibada uga soo baxay isaga oo cago jiidaya

wuxuu u yimi haweeya ooo kuraastii barandaha tiilay ku dul luloota y(hurdo) markii ay waysay wax la sheekaysta iyo wax

u wehel yeela ,reerkiina ay aragtay inay u fadhiyaan shir ay albaabadu u xiran yihiin ayay iska seexatay,farxaan markii uu arkay inay hurudo ayay calooshu gadoontay,wuxuuna niyada iska yidhi miskiin allaa u maqan,wuxuu soo xasuustay go'aankii qalafsanaa ee uu aabihii gaadhay iyo sida ay haweeya uga war la' dahay miskiinta alloow yaa u sheega in iyada loo mindiyo lisanaayo,alloow nimaan wax ogayn ha cadaabin,

wax uu fadhiyo barandadii dhaxanta bad-naa goor danbe ayay cadahay ayaa waxaa u yeedhay hooyadiis,waxayna ku tidhi u yeedh gabadha ha seexatee,adiguna orod oo seexo haday cashada idiin bisishahayna cuna.

Farxaan oo rajo yari soo gashay aanse ogayn waxa go'aan lagu gaadhay ayaa yidhi "waa tahay" hooyo.

Warsame iyo maryan waxay u gudbeen qolkoodii jiifka,farxaan wuxuu hurdadii ka kiciyey haweeya,wuxuuna ku yidhi maxaad la lulootay? miyaad cidlootay?



Ina mari cashaynee,haweeya oo dhaxantii ka-Gashay lafaha ayaa mar keliya kasoo booday Hurdadii,waxayna ugu jawaabtay""maya ma'aan Cid la'aan ee hurdo ayaa ila tagtay""waa la-Isa soo racay,waxaana la soo dul fadhiistay Miiskii cuntada,oo ay sucaad ku sii dabooshay Cashadii,waana la isku khasbay,farxaan Wuxuu cashada la cuni kari waysanaa"go'aan-Kii aabihii ee qalafsanaa ee uu aabihii soo-Jeediyay ayaa wel-wel ku abuurtay" haweeyana Waxay la cashayn kari wayday"hurdadii haysay Iyo dhaxantii caawoo dhan jiiftay oo lafaha Ka gashay".

Iyadu war uma aanay hayn doodii qaraar-Syd ee dhex martay farxaan iyo waalidkiis, Iyo in caawa go'aan lagu gaaray in guriga Laga eryo,sirmaqabe allaa u sahan ahe Farxaan haweeya uma uu muujin wax dareen ah,

Labadoodaba casho cunidu daacad kama Aysan ahayn,ee midba midka kale ayuu u Madax buuxinayay,markii laga kacay cashadii Ayuu farxaan is taagay oo wejiga ka dhunkaday Haweeya,kuna yidhi "habeen wanaagsan iyo Hurdo fiican" sidaas ayaana habeenkii lagu Kala seexday iyadoo qofba gooni u caraysan

Yahay, haweeyase waxba kama aanay ogayn
Waxa dhacay,Farxaana laba indhood isuma
Keenin habeenkii oo dhan,wuxuu daalaca
Nayey buugii murugada,hurdo wuu iska
Waayey,wuxuuna ka fekerayey go'aanka ay

Gaareen hooyadii iyo aabihii,wax uu
Galgashaba goor danbe oo ay xeero iyo
Fandhaal kala dhaceen ayuu gam'ay,

Waagii markuu beryay ayaa hurdadii laga
Wada toosay,sucaad baa timid sidii caa-
Dadu u ahayd,waxayna diyaarisay quraac-
Dii,waana lawada quraacday iyada oo aanan
Qofna qof la hadlin.

Farxaan iyo aabihii waxay u diyaar
Garoobeen inay is raacaan si uu odaygu
U soo kormeero hawlo badan oo qabyo
Ka ahaa markuu dalka ka tegay iyo sida
Ay u socoto hawlaha bakhaaradu,iyo
Sida farxaan wax u qabtay.

Gurigii ayay iska raaceen,waxay-
Na ku dhaqaaqeen sidii ay hawlahaas
U soo gaba gabeyn lahaayeen,waxaana i
Sku soo haray haweeya iyo maryan,
Maryan ayaa waraysi ugu dhaqaaqday ha
Haweeya,iyado wax walba sida ay ahaa
Yeen ay uga jawaabtay,maryana garatay
In hadalkii farxaan iyo kii haweeya is
Waafaqeen,wax cabaar la is waraystaba
Waxay haweeyi ka kacday dhankii jikada,
Si ay ula kaalmeyso sucaad shaqada,



waxay iyada iyo sucaad u qalab qaateen inay diyaariyaan qadada,maryan waxaa qanciyey hadal macaanida haweeya,iyo hoowl karnimadee -da,waxaase maryan u diidanaa inay ku hamido haweeya oo inankeeda cori u noqota.

oday warsame wuxuu ahaa oday go'aanka uu gooyo aan hadal laga soo daba celin karin waxaa la gaaray waqtigii qadada,waxaa gurigii kusoo wada noqday farxaan iyo warsame oo wada socda,waxay wada galeen qolkii fadhiga,wax-yar kadib waxaa usoo gashay haweeya oo sida laba koob oo sharaab ah,

Warsame ma aanuu arki karayn haweeya waayo wuxuu ka qabay fikrad xun,wuxuuna u haystay gabadh xun oo reerkoodii iska soo dayriyey,rabtana inay wiilkiisa isaga soo dhigto malaaig,kana duufsato,wuxuuna isku yara celinaayey go'aan ay gaadheen xalay isaga iyo afadiisu.

Waxay wada cabeen sharaabkii,halkii a agayna ku yara nasteen,waxyar kadib ayaa la isugu yeeray qado in loo fadhiisto,markii qadadii laga farxashay warsame ayaa ku yidhi

wiilkiisa farxaanoow diyaar noqo aroorta (subixii) ayaad baxaysaa, waxaadna tagaysaa hargaysa, si aad usoo ogaato xaalada gaadhigeenii jabnaa ee ku cadilaa Hargaysa in la sameeyey iyo in kale, farxaan hadalkaas kuma aanuu farxin ee wuxuu ku noqday mid naxdin iyo welwel ku beeray

Farxaan wuxuu gartay in aabihii ujeedo ka wato safarkan dag-daga ah, ee uu kusoo oogay, wuxuuse garan la'aa ujeedadiisa iyo waxa ka danbeeya, farxaan hadalkii ayuu

qaatay ileen hadal kama soo celin karee Haweeya qudheedu dhan bay ka walwalsanayd waayo waxay ka naxday safarkan dag-daga ah ee lagu amray gacaliyaheeda, waxay ka fakaraysay kala fogaanta soo kala dhex gashay ileen haweeya ma oga inay iyadu sabab u tahay tahay safarka farxaan lagu masaafurinaayo mana oga in iyada loo mindiyo lisanaayo.

Maryan iyada waxba kama qarsana sheekada oo dhan way la socotaa, laakiin is waydiintu waxay tahay ma waxbay ka qaban kartaa? jawaabtu waa maya, halkii ayuu ku tagay oday warsame markuu hadalkiisii dhamaystay.



Farxaan wajigiisa caadi ma ahayn maalintaas haweeya way garanaysay dhibaatada ka muuqata gacaliyaheeda, waxbase uma aanay qaban karin

Farxaan kolkiiba isaga oo cago jiidaya ayuu galay qolkiisii, wuxuuna isku tuuray sariirtiisii, haweeya ayaa looga dul tagay miiskii wax lagu cunay,

Haweeya waxay damacsanayd inay farxaan u gasho oo ay hilmaansiiso walwalka haya, waxayse ka cabsi qabtay hadii ay qolkiisa ugu gasho in warsame iyo maryan ka qaadaan cuqdadd(kumbuleeso)waxay ka cabsataba, waxay marba aqalka iridiisa kasoo noqotaba ugu danbayntii way is celin weyday, waxayna ku indho adaygtay inay u gasho.

Markay qolkii soo gashayba waxay indhaha ku dhufatay farxaan oo sariirtiisii ku xooran, uguna jiifa si aan caadi ahayn, kuna dul fakaraya, way kusoo dhawaatay soona dul istaagtay iyadoo leh maxaa ku helay gacaliye oo aad ka fakaraysaa?
Farxaan baa ku jawaabay, waxaan ka fakarayaa

Safarkan dag daga ah ee isoo food saaray iyo cidladaan aan kaaga tagayo,haweeya oo dajinaysa farxaan ayaa tiri waxba aniga igama ba'ayan oo guri buuxa ayaan joogaa ee waxba ha ka fakarin xagayga,Ilaahayna waxaan ka baryayaa in adiga oo nabad qaba uu kusoo nabad cesho,intay sariirtii dhinac uga fariisatay ayay biloowday inay madadaaliso,isna anta uu jiifkii kasoo toosay oo sariirtii kusoo fadhiistay ayuu u sheegay in marka uu soo noqdo ay qqal gali doonaan,hadana ay halkan ku sii sugto,haweeya waxay dhaar ku martay in wax kasta oo dhaca haddii aanay kala dhiman aanay nin kale oon isaga ahayn u hawoonayn,isna sidaa si le'eg ayuu ugu dhaartay.

Waxaa la dhigtay axdi hor leh oo maamalintaas dhidibada loo aasay,sidaas a ayayna ku balameen.

Farxaan galabnimadii ayuu guriga ka baxay si uu ula soo socodsiiyo safarkiisa asxaabtiisa,markii uu kasoo noqdayna wuxuu bilaabay inuu dharkiisii iyo wixii alaab a ahaa ee uu safarka ku gali lahaa uu sii urursaday,haweeya qudheeda dhinac ayay ka



qalqaalinaysay gacaliyaheeda,gmortii uu oğaaday in wax walbaa diyaar u yihiin ayuu gacanta soo qabsaday haweeya si uu ula sii dardaarmo,waxayna fadhiisteen jardiinkii guriga.

Waqtigaas maryan iyo Warsame may joogin ee waxay ku maqnaayeen qaraabo salaan farxaan wuxuu kula dardaarmay haweeya sidan:-

Gacaliso waad ogtahay oo bari ayaan baxayaa,markaa waxaan kaala dardaarmayaa inaadan iloobin Axdigeenii jacayla aniga oo ku rajo waynahay in aadan iloobay

Gacalo waxaa kale oo aan kaala dardaarmayaa in aad noqoto ruux dhago fudud oo laga mahad sheegto,awalba waad fiicnayd hadana waxaan kaa doonayaa dhago fudayd iyo in aan lagaa sheegan,

farxaan ugu danbaytii wuxuu dardaarankii kusoo gabagabeeyey sidan.

''' gacaliso duruuf kasta oo kusoo wajahdaa waa in aad kaga gudubtaa adkaysi iyo dulqaad

ogoow jacaylkaagu inuu ku milan yahay dhiigayga,lana shaqeeyo jirkayga,ha iga malaysan inaan ku iloobo,wax kasta oo dhacana kuma iloobi karo Waxaan quutaa, kuna shaqeeya Kuna socdaa waa muuqaaga,codkaagu wuxuu ii yahay cuntada ugu wanaagsan ee aan quuto,waxaad ka shaqaysiisaa xubnaha jirkayga oo idil,gacalo safarkani wuxuu ii yahay dhib,laakiin waa in aynu duruuf kasta u babac dhigno,hana dhayalsan axdigii jacaylka.

Haweeya oo ay ka socoto ilin ayaa ku tiraabtay:
gacalie ma arko,maqlo ruux aan adiga ahayn saablaydeyda waxaad ku leedahay guryo ay adag tahay dumistoodu,iska saar walwalka iyo dhibaatada waxaan kuu hayaa axdi aan la dhayalsan karin kaasoo ah Axdigii jacaylka

Dardaarankii kadib ayay waxoogaa meeshii kusoo yara caweeyeen,oohintii haweeya iyo fikarkii farxaan daqiiqado kadib waxay isu badaleen qosol iyo farxad,halkii ayay ku kala hoydeen habeenkaas mid kasta isaga oo maqsuud ah.

Waagii ayaa baryey sidii caadadu ahayd farxaana wuxuu u diyaargarooobay safarkiisii



Uu ku qabanaayey magaalada hargaysa,markii uu diyaar noqday ayuu macsalaameeyay hooyadiis,aabihiis iyo sucaad,ugu danbayntiina wuxuu u yimihaweeya oo taagan irida aqalka haweeya ayaa is celin waydday oo inta ay ku soo booday isku duubtay kana dhukatay labada dhaban,markaasay ku dul ooyday,farxaan qudhii isu wuu ilmaynaayey markii ay soo kala tag een oo ay is macsalaameeyeen ayuu farxaan gooni ugu yeeray hooyadiis,wuxuuna ku yiri hooyooy waxaan kaa codsanayaa inaad gabadhaas ii sii xanaanaysid oo ay guriga ku sii noolaato inta aan ka imanayo,waxaa kale oo aan kaa codsanayaa inaad aabo iga sii maslaxdid,m

Maryan baa wiilkeeda ku tidhi waa tahay hooyo waan isku dayayaa sidii aan kaaga maslixi lahaa,kolay aabahaa waad ogtahay oo wuxuu mar ku dhawaaqo wuu ku dhawaaqay ee

Farxaan sidaas ayuu uga baxay gurigii waxaana u bilaabmay safarkiisii,warsame markuu hubsaday in farxaan ka baxay magaaladii ayuu maryan ku amray inay haweeya guriga ka erido,run ahaantii maryan waxay isku dayday inay odayga dajiso hase yeeshee inta uu

ku xanaaqay ayuu ku yidhi'naa ma aniga ayaad marba qorshe iila imanaysaa,orod oo naagta gurigayga iiga saar hadii kale wax xileh ayaad isku arkaysaa,maryan oo lafaheedii u baqday wax ay ku hadashana la'a ayaa waxaa buuqoodii kusoo baxay haweeya,markay dhagta u dhigtayna waxay ogaatay in cida loo dig iyo dam leeyahay ay iyada tahay,talo ayaa ku cadaatay meel ay u dhaqaaqdo ayay garan wayday,iyada oo meeshii ay taagnayd ku qalashay naxdin awgeed ayuu warsame u yimi,wuxuuna ku yidhi:

naa waa gabadha orod oo iiga bax gurigayga agagaarkiisana gaanankugu arag,hadana wixii alaab kaa taal soo ururuso,

Haweeya oo cago jiidaysa miyirna aan lahayn oo meel ay u socoto iyo meel ay joogtaba aan garanayn ayaa qolkii dib ugu noqotay kana soo urursatay alaabteedii,haweeya indhaheeda waxaa ka socday ilin,markay qolkii dibada uga soo baxday ayay u timi maryan kuna tidhi ''nabad gelyo hooyo'' run ahaantii maryan aad bay uga xumayd in haweeya guriga ka tagto,warsame ayaa ku qayliyey oo ku yidhi naa isoo dhaaf meel aan joogo iyo agagaarkeeda toona kuguma arki karo ee,haweeya ayaa u timi sucaad waxayna ku tidhi walaal waxaad farxaan



iga gaarsii inaan mar uun is arki doono haddi rabi idmo,isagana aan sugayo balantii inaga dhaxaysayna aan adkaynayo,iguna salaan.

Sucaad oo ka xun tagida ay haweeya ka tagayso guriga ayaa u balan qaaday inay u sheegi doonto marka ugu horaysa ee ay aragto.

Bal

DH A M A A D

Q A Y B T I I

Haad

Balse akhristoo is waydiintu waxay tahay haweeya halkay u ciirsan doontaa? Maxaye samayn doontaa?ma xejindoontaa Axdigii ay la gashay gacaliyaheedda?

Farxaanse muxuu samayn doonaa marka uu maqlo in haweeya laga eryey gurigii?miyuu is dili?mise wuu waalan? miyuu samri doonaa? mase xejin doonaa axdigii uu la galay gacaladiisa? dhamaan waxaabahaas oo dhan waxaad ka heli doontaa qaybta labaad ee buugan oo soo bixi doonta dhawaan,haddii rabi idmo.

Allahayoow aduunyadu
Rafaad iyo dhib badanaa
Labadii is doortee
Dookh odu is raacee
Axdi jacayl dhex yaalana
Sadexeeye badanaa
Kol hadaanan garanayn
Safarkaygu meeshuu ku sugnaanayo
Allahayoow sidii roon
Hawlaha u samo bixi.

Daaimoow allahayoow
Jacayl waa dabayl iyo
Duufaan is wadatoo
Ruuxna wuu duleeyaa,
Midna darajo dheer iyo
Guri lagu nagaadiyo
Baraaruu u dooraa
Allahayoow dadka isjecel
Doqon aan wax garan iyo
Dire diraale ka ogoow

La soco qaybta labaad ee

BUUGAN

"GACALO: Ogew inaanan ku hurayn, kuna Hilmaami karin, lagama yaabo in xataa Hadaad god gasho aan ku ilaabo, waxaan Ku socdaa, kuna shaqeeyaa waa muuqaa-Ga, codkaagu wuxuu ii yahay cuntada Iigu wanaagsan ee aan quute, waxaad Ka shaqaysiisaa xubnaha jirkeyga oo Idil, GACALO safarkani waxuu igu ya-Hay dhib, laakiin waa inaynu duruuf Kasta u babac dhignaa, hana dhayal-San AXDIGII JACAYLKA.""

""GACALIYE, ma arko, maqlo Ruux aan adiga ahayn, saableydey-Da waxaad ku leedahay guryo ay Dumistoodu adag tahay, iska saar Wel-welka iyo dhibaatada, waxaan Kuu hayaa AXDI aan la dhayalsan Karin, kaas oo ah AXDI JACAYL.""